

Talooyin cusub oo ku socda ardayda dugsiyada

Waxaa hadda soo baxay laba talooyin oo ku saabsan ardayda dugsiyada. Midda hore waxay tahay in markale la xiri doono dugsiyada sare. Tan kalena waxay tahay in ilmaha yar yar, ee la deggan qof weyn oo uu cudurkii ku dhacay, ay guriga joogayaan.

Intaan ku jiray xilligii dayrta waxaa soo baxay sharciyo badan. Kuwaas oo saameeyey qeybaha kala duwan ee bulshada. Hadda waxa ay hay'adda caafimaadku ku talinaysaa in ardayda dugsiyada sare ay wax barashadooda ku dhigtaan ayagoo guryahooda jooga.

Waxa ay arrintani khuseysaa inta badan ardayda, mase aha dhamaantood. Ardayda dhigata qaybaha farsamada ee dugsiyada sare waxay u baahan yihiin taba baradooda oo ka dhaca dugsiyada oo waa iney yimaadaan. Sidoo kale waxaa jira arday aan luqadda si wanaagsan u aqoon, ama ku nool guryo cadhiidhi ah iyo kuwa aan kombiyuutaro haysan.

Ardayda qaarkood waxa ay u baahan yihiin xiriir dhaw oo ay la yeeshaan macallimiintooda , si ay ugu guulaystaan waxbarashadooda. Hay'adda caafimaadku waxay doonaysaa in ardaydaas ay dugsiyada tagaan.

Sharcigan cusub waxaa looga gol leeyahay in da'yartu aaney dibadda joogin , ciriirina ka abuurin bulshada dhexdeeda. Johan Carlsson oo ah madaxa hay'adda caafimaadka, wuxuu leeyahay waa inay ardayda dugsiyada sare

raacaan talooyinka xataa markay guriga joogaan. Waa inay ka fogaadaan dadka kale.

”Hadda markuu cudurka ku fidayo waddanka oo idil waa inaan loo kulmin koox koox” sidaa waxaa tiri Ana Norlén, oo ah madaxa diyaar garowga ee gobolka. Waqtigii xafladaha la dhigan jiray, la kulmi jiray, la wada shaahayn jiray ama la dukaamaysan jiray ma aha hadda. Waxaa dhici karta inaad cudurka qaaddo ama adiga qaadsiiso. Qof walba waa inuu ka qayb qaataa xakamaynta cudurka”

Talooyinkan waxay soconayaan xilli dugsiyeedkaan iyo bilowga kan soo socda. Laga bilaabo 7 diseembar ilaa 6-da janawari. Kadib waxaa soo bixi doona go'aan cusub.

Ardayda uu qoyskooda cudurku haleelay , waa in ay joogaan guriga.

Dugsiyada hoose iyo kuwa xannaanada waa ay furnaanayaan. Markii hore ilmaha aaney ka muuqan wax calaamadaha cudurka ah, xataa haddii uu waalidkood cudurka qabo waa ay imaan jireen dugsiyada. Hadda taas waa la badalay.

Carruurta la deggan qof laga helay cudurka, waa iney guriga joogaan. Shan cisho waa inay guriga joogaan. Markaa kadib ilmuhu dugsiyada ama xannaanadii wuu ku laaban karaa, haddii aaney ka muuqan calaamadihii cudurka.

Ilmaha yar yar inta badan ma xanuunsadaan mana gudbiyaan cudurka. Laakiin macallimiin badan baa wel wel ka muujiyay in caruurta uu gurigooda ka jiro Karoonaha ay ku daartaan. Waxa ay taasi u keentay inay shaqadoodii ku adkaato.

”Macallimiintu uguma dhaco cudurkan in ka badan dadka shaqooyinka kale qabta” sidaa waxaa yiri Johan Carlsson oo ah madaxa hay'adda caafimaadka. ” Waxaase muhiim ah in qofku shaqadiisa ku dareemo nabad gelyo” Sidaa ayaa taladan loo keenay.



Labadii wiigba marbaan warqaddan warbixinta soo saari doonaa. Qoraalkan warbixinta ah waxaa soo diyaariyey, hay'adda xaaladaha degdegga ah ee gobolka. Hay'adda xaaladda deg degga ah ee gobolka Kalmar waa wada shaqeyn ka dhaxaysa dhammaan degmooyinka gobolka, gobolka , hay'adda caafimaadka ee gobolka iyo mas'uuliyiin kale oo gobolka ah. Markay xaalad deg deg ahi ka dhex dhacdo bulshada, si wada jir ah baynu isu caawinnaa.



facebook.com/krissamverkan.kalmar



**VÄSTERVIKS
KOMMUN**